# Waddooyin Ammaan ah oo loogu talogalay Falanqaynta Sinaanta Jinsiyadaha ee Iskuulka

SOMALI

## HADAFKA SINAANTA JINSIYADAHA

Hadafkeenu wuxuu yahay in carruurta dhigta iskuulka Seattle ay ku bilaabaan maalintooda in ay ka faa'ideystaan socodka lugaha ah iyo baaskiil wadida ay ku aadaan iskuulka, ay ku jirto:

- In ay baashaalaan
- Dareemaan ammaan
- Xoojiyaan xiriirada ay la leeyihiin bulshadooda
- Ku imaadaan iskuulka wakhtigii loogu talogalay ee quracda oona diyaar u noqdaan in ay wax bartaan
- Lahaadaan caafimaad jir iyo maskax wanaagsan

Si loo adkeeyo dadaalka Seattle ee lagu dhammaynayo midab takoorka hay'adeed oona loo sameeyo magaalo loo simanyahay, waxaan diirada saarnay ardayda kamid ah kooxahaan: bulshooyinka midabka leh, bulshooyinka leh dakhli-hoose, dadka qabba naafooyin, dadka ay hayso guri la'aan ama ammaan la'aan guriga ah, bulshada LGBTQ, iyo gabdhaha.



## HABKA FALANQAYNTA SINAANTA JINSIYADAHA

Inta lagu guda jiro sannadka soo socda, falanqaynteena sinaanta jinsiyadaha waxay noqon doontaa:



**Dayrta 2017**
Xogta falanqaynta ku saabsan sida aynu ugu adeegnay bulshooyinka Qaboobihii

**Hore ee 2018**
Uga qaybgalinta dadka uu saameeyay barnaamijkeena qaab wada hadal iyo sahan



Waxaan iskaashi la samaynaynaa iskuuladaan soo socda ayada oo ay kusalaysantahay jinsiyada qowmiyada, ardaydooda, iyo kala duwanaanshaha luuqada:

- Aki Kurose Middle School
- Bailey Gatzert Elementary
- Concord Elementary
- Dearborn Park Elementary
- Dunlap Elementary
- Rainier Beach High School
- West Seattle Elementary
- Wing Luke Elementary



**Gu'ga 2018**
Waxaan dejinaa xeelado cusub iyo iskaashi si loo gaaro hadafkeena sinaanta jinsiyada. In aynu aqoonsano qiyaasaha qiimeynta si aynu u qiyaasno horumarkeena ku aadan hadafkaan



**Xagaaga 2018**
In dib loogu sheego bulshooyinka

Waxaan ballan ku marnay in aynu la shaqayno bulshooyinka si aynu si fiican ugu fahano sida aynu ku wanaajinayno barnaamijka Iskuulka ee loogu talogalay Waddooyinka Ammaanka ah si aynu ugu adeegno ardayda Seattle ee midabka leh qaababka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah.

**WAXAAN DOONAYNAA IN AYNU KU MAQALNO!**
Ka fiiri sahankeena iimaylka, tooska internetka, iyo iskuulada iyo ururada bulshada ku yaala Seattle.

**MACLUUMAADKA XIRIIRKA**
www.seattle.gov/transportation/projects-and-programs/safety-first/safe-routes-to-school
Hormuudka Mashruuca | Mitchell Lloyd | (206) 256-5378 | mitchell.lloyd@seattle.gov
Waddooyinka Ammaanka ah ee loogu talogalay Maamulaha Barnaamijka Iskuulka | Ashley Rhead
(206) 684-7577 | ashley.rhead@seattle.gov


Seattle Department of Transportation

## SABAB AY MUHIIM UGU TAHAY WADDOOYINKA AMMAANKA AH EE ISKUULKA FALANQAYNTA SINAANTA JINSIYADA?


Heerarka baaskiilka la raaco iyo socodka ardayda si xoogan ayay hoos ugu dhaceen halka buurnaanta dhallinyarada ay laba laabantay afartankii sanno ee lasoo dhaafay; midaana waxay si aanan isku mid ahayn u saamaysay bulshooyinka midabka leh.

- Carruurta Laatiinka iyo Madowga ah waxay leeyihiin heerar sareeya oo buurnaan ah waxayna haystaan galida ugu yar ee lagu galo beeraha, garoomada ciyaarta, ama waddooyinka lagu socon karo
- Ku dhowaadkii ¼ oo ah dhallinyarada Madowga ah waxay helayaan wax ka yar saacada lasoo jeediyay ee hawsha jirka maalin laha ah, marka lala bandhigo 13% oo dhallinyarada Caddaanka ah
- Gudaha Seattle, iskuulada dhigta tirada ugu saraysa ee ardayda midabka leh waxay haystaan heerar socod iyo baaskiil wadasho ah marka lala bar-bardhigo iskuulada dhigta wax ka yar 50% oo ardayda midabka leh

**Tirada boqolkiiba ee Ardayda Seattle ee 2015 kuwaas oo raaca Baskiilka oona Lugaha ku socda ee Jinsiyad ahaan**





Si looga dhabeeyo hadafkeena, waxaynu u baahanahay in aynu fahano kala duwanaanshaha ku saabsan heerarka socodka iyo baaskiil wadashada midkaas oo ka dhex jira ardayda Seattle, oona loogula shaqeeyo bulshada xalinta mushkiladaasi.



Socodka joogtada ah ee lagu aado iskuulka wuxuu leeyahay dheefo caafimaad joogto ah wuxuuna yarayn karaa khatarta buurnaanta dhallinyarada ku dhacda midaas oo lala xiriiriyo:

- cudurka wadnaha
- sonkorow
- kansar
- xanuun istaag maskaxda ah

Wax qabadka baddan ee jirka ah sidoo kale wuxuu wanaajinayaa caafimaadka jirka iyo maskaxda iyo guul waxbarasho.




Barnaamijka Iskuulka ee Waddooyinka Ammaanka ah ee Seattle wuxuu qaadanayaa tallaabo kusalaysan-sinaan kor loogu qaadayo hawl socod baddan ah oo ka dhacda ardayda dhexdooda sababtoo ah dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan caafimaad, farxad, iyo guul waxbarasho, ayada oo aan la eegaynin jinsiyadooda.

## WADDOOYINKA AMMAANKA EE LOOGU TALOGALAY BARNAAMIJKA ISKUULKA

Barnaamijka Iskuulka ee loogu talogalay Waddooyinka Ammaanka ah ee Waaxda Gaadiidka Seattle wuxuu u shaqeeyaa si loogu fududeeyo oona ammaan loogu dhigo ardayda u soconaya oona baaskiilka u raacaya iskuulka. Waxaan isticmaalnaa xeelado isku dhafan:

- **Waxbarasho** – ayada oo la hubsanayo in qofkasta uu barto sida loogu safro ama loogu socdo si ammaan ah
- **Dhiiragelin** – ayada oo lagu dhiirinayo socodka iyo baaskiil wadashada bulshada iskuulka
- **Injineernimo** – mashruucyo wax dhisid sida in lagu dhiso waddada dhinaceeda meelo lagu socdo oo cusub, meelo lagu gudbo oo ammaan ah, iyo waddooyin horumarsan oo baaskiilada lagu wato
- **Fullin** – ayada oo iskaashi lala galayo Waaxda Booliiska Seattle si loo fulliyo sharciyada ammaanka taraafikada
- **Qiimeyn** – in lala socodo horumarka ku aadan ujeeddooyinkeena ammaanka aynu dadka la wadaagnay
- **Xoojin** – ayada oo la siinayo xogag ama illooyin horyaalada iskuulka